

OFFICIAL CITY BUSINESS

1787-00



City of Boston

c/o Direct Energy

P.O. Box 180

Tulsa, OK 74101-0180

PRESORTED
FIRST CLASS MAIL
U.S. Postage
PAID
APLUS
08701

HA FUDUDEYSAN - OGEYSIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN HOOS U DHIGIDA QIIMAYAASHA KORONTADA



Dariskeyga ,

Magaallada Boston waxay ka shaqaynaysa inay u keento korontada qiimaha sugan leh, la awooddi karo oo dib loo cusbooneysiin karo dhammaanka dadka deegaanka - iyadda oo aan loo eegaynin dakhliga. [Bulshada Boston, Dookha Korontada Boston \(Community Choice Electricity\)](#) (BCCE) waa barnaamijkeena ay magaaladda maamusho kaas oo ka shaqeeya inuu ku badbaadiyo lacag isaga oo uu ku siinaya tamar nadiif ah. BCCE hadda waxay bixisaa tamar dib u cusbooneysiinta iyo kharashaadka ka yar qiimaha Adeegga Aasaasiga Eversource. Intii lagu jiray lixda bilood ee ugu horeeyay sanadkii 2023, dadka reer Boston ee isticmaala BCCE ayaa badbaadshay ku dhawaad \$60 milyan oo lacag ah, kaydadka guriga oo celcelis ahaan dhan \$340 marka loo eego adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource.

BCCE ayaa bixisa sadex agabka korontada ah: [Ikhtiyaar Caadi ah](#), [Aasaasi](#), iyo [Tamarta Nadiifta ah ee Ikhtiyaariga ah 100](#).

IKHTIYAARI AASAASIGA AH	HEERKA CAADIGA AH <i>(cilada)</i>	GREEN 100
<p style="text-align: center;">\$0.14205/ kWh Diiseembar 2023 - Janaayo 2025</p> <p style="text-align: center;">24% Tamarta la cusboonaysiin karo</p>	<p style="text-align: center;">\$0.14805/ kWh Diiseembar 2023 - Janaayo 2025</p> <p style="text-align: center;">39% Tamarta la cusboonaysiin karo</p>	<p style="text-align: center;">\$0.17195/ kWh Diiseembar 2023 - Janaayo 2025</p> <p style="text-align: center;">100% Tamarta la cusboonaysiin karo</p>

Labadaba Dookhyada Caadiga ah iyo kan Tamarta Nadiifta ah ee 100 ayaa bixinaaya adeeg koronto oo la cusboonaysiin karo oo ka balaaran kan Eversource. Inkastoo uusan barnaamijku damaanad qaadi karin kaydadka, dhammaan sadexda adeeg ee BCCE ayaa ka raqiisan qiimaha Adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource (\$0.17216/kWh) ilaa ugu yaraan Luuliyo 2024. Dadka deegaanka ee ka diiwaan gashan qorshaha Caadiga ah ee BCCE, kuwaasoo adeegsada celcelis ahaan 600 kWh/bishii, ayaa badbaadsan kara ku dhawaad \$15 bishii oo uga bixi jiray korontada. Iskuday inaad doorato Dookha Tamarta Nadiifta ah ee 100 kaasoo baxsha tamarta 100% maxaliga ah, ee la cusbooneysiin karo ee ka timaada ilaha sida dabaysha iyo soolarka.

Macaamiisha qaata gunnooyinka kaalmada dowladda, oo dakhligooda qoysku yahay ama kayar yahay 60% celceliska dakhliga ee gobalka, ayaa u qalmi kara qiimo dhimis loogu sameeyo adeegooda korontada. Booqo [Eversource.com/billhelp](#) si aad u codsato. Ka qaybgalka BCCE ayaan faro gelin doonin daymanka Eversource, qorsheyaasha lacag bixinta, ama qiimo dhimisyada. Dadka deegaanka ee u baahan caawimaada waa inay booqdaan [boston.gov/energy](#).

Ciwaankaaga ayaa si toos ah looga diiwaan gelin doonaa qorshah Caadiga ah ee cabirka korontadaada Maajo 2024. Waxaad arki doontaa in arintaan lagu daro qarashkaaga Juun 2024 ee Eversource. Waxaad dalban kartaa kordin, yareyn, ama inaad iskaga baxdo adeegga bilaa ganaax. Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo barta oonlaynka ah oo ah [boston.gov/bcce](#), wac 3-1-1, ama iimeel u dir bcce@boston.gov.

Boston Community Choice Electricity waa farsamo wax ku ool ah, oo qiimo la awoodi karo leh si looga caawiyo in Boston u gurto nidaam tamareed cadaalad ah. Haddii aan iskaashano waxaan awoodnaa inaan dhiso Boston nadiif ah, oo caafimaad u leh jiilalka mustaqbalka. Waad ku mahadsan tahay wada shaqayntaada!

Reverend Mariama White-Hammond
Madaxa Bii'ada, Tamarta, iyo Dhulka Banaan



Dariska Qaaliga ah,

Magaallada Boston waxay ka shaqaynaysa inay u keento korontada qiimaha sugan leh, la awooddi karo oo dib loo cusbooneysiin karo dhammaanka macaamiisheeda.

[Bulshada Boston, Dookha Korontada Boston \(Community Choice Electricity\)](#) (BCCE) waa barnaamijkeena ay magaalladu maamusho kaas oo ka shaqeeya inuu ku badbaadiyo lacag isaga oo uu ku siinaya tamar nadiif ah. BCCE hadda waxay bixisaa tamar dib u cusbooneysiinta iyo kharashaadka ka yar qiimaha Adeegga Aasaasiga Eversource. Keliya lixdii bilood ee ugu horaysay sanadkii 2023, macaamiisha ganacsiga iyo warshadaha ayaa badbaadsaday in ka badan \$50 milyan oo doolar marka loo eego Adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource.

BCCE ayaa bixisa sadex agabka korontada ah: [Ikhtiyaar Caadi ah](#), [Aasaasi](#), iyo [Tamarta Nadiifta ah ee Ikhtiyaariga ah 100](#).

IKHTIYAARI AASAASIGA AH	HEERKA CAADIGA AH (<i>cilada</i>)	GREEN 100
<p style="text-align: center;">\$0.14205/ kWh Diiseembar 2023 - Janaayo 2025</p> <p style="text-align: center;">24% Tamarta la cusboonaysiin karo</p>	<p style="text-align: center;">\$0.14805/ kWh Diiseembar 2023 - Janaayo 2025</p> <p style="text-align: center;">39% Tamarta la cusboonaysiin karo</p>	<p style="text-align: center;">\$0.17195/ kWh Diiseembar 2023 - Janaayo 2025</p> <p style="text-align: center;">100% Tamarta la cusboonaysiin karo</p>

Labadaba Dookhyada Caadiga ah iyo kan Tamarta Nadiifta ah ee 100 ayaa bixinaaya adeeg koronto oo la cusboonaysiin karo oo ka balaaran kan Eversource. Inkastoo uusan barnaamijku damaanad qaadi karin kaydadka, dhammaan sadexda adeeg ee BCCE ayaa ka raqiisan qiimaha Adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource ee ganacsiga (\$0.17552/kWh) iyo warshadaha (\$0.11668/kWh) ilaa ugu yaraan Luuliyo 2024. Macaamiisha ganacsiga ee ka diiwaan gashan qorshaha Caadiga ah ee BCCE, kuwaasoo adeegsada celcelis ahaan 1000 kWh/bishii, ayaa badbaadsan kara ku dhawaad \$30 bishii oo uga bixi jiray korontada. Iskuday inaad doorato Dookha Tamarta Nadiifta ah ee 100 kaasoo baxsha tamarta 100% maxaliga ah, ee la cusbooneysiin karo ee ka timaada ilaha sida dabaysha iyo soolarka.

Macaamiisha leh koontooyinka badan ee Eversource ee korontada, waxaad ka helaysaa lambarka koontada ee diiwaan gelintaan kaarka ku jira ee ka bixida. Koontooyinka ganacsiga iyo warshadaha ee adeegsada 1.5 milyan oo kWh/sanadkii ama ka badan ee doonaaya inay ku biiraan BCCE ayaa la siin karaa qiimaha hadda ee suuqa badelkii la siin lahaa qiimaha barnaamijka. Haddii aad horay u dooratay koronto bixiye waa inaad ka baxdaa Barnaamijkaan. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad korontadaada ka sii hesho koronto bixiye qiimo jaban. Haddii koontadaada laga dhaafay canshuurta, nuqulka Shardi Dhaafka Tamarta Ganacsigaaga yar (<https://www.cityofbostoncce.com/small-business-tax-exemption/>) waa in loogu diraa Direct Energy ciwaanka usn.taxexemption@directenergy.com ama fakiska loogu diro **1-800-504-7428** si aad u sii hesho cafiska canshuurta.

Ciwaankaaga ayaa si toos ah looga diiwaan gelin doonaa qorshah Caadiga ah ee cabirka korontadaada Maajo 2024. Waxaad arki doontaa in arintaan lagu daro qarashkaaga Juun 2024 ee Eversource. Waxaad dalban kartaa kordin, yareyn, ama inaad iskaga baxdo adeegga bilaa ganaax. Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo barta onlaynka ah oo ah boston.gov/bcce, wac **3-1-1**, ama iimeel u dir bcce@boston.gov.

Boston Community Choice Electricity waa farsamo wax ku ool ah, oo qiimo la awoodi karo leh si looga caawiyo in Boston u guurto nidaam tamareed cadaalad ah. Haddii aan iskaashano waxaan awoodnaa inaan dhisno Boston nadiif ah, oo caafimaad u leh jiilalka mustaqbalka. Waad ku mahadsan tahay wada shaqayntaada!

Reverend Mariama White-Hammond
Madaxa Bii'ada, Tamarta, iyo Dhulka Banaan



BARNAAMIJKA DOOKHA KORONTADA BULSHADA (COMMUNITY CHOICE ELECTRICITY) EE MAGAALLADA BOSTON OGEYSIINTA MACAAMIISHA

Jimco, Bisha Saddexaad 15, 2024

Macaamiil Qaaliga ah ee Adeegga Aasaasiga ah ee Boston:

Magaaladda Boston waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqo **Direct Energy Services, LLC** ("Direct Energy") in loo doortay inay noqoto bixiyaheeda Barnaamijka Tamarta Dookha Bulshada (Community Choice Electricity Program) ("Barnaamijka"). Barnaamijkan wuxuu mideynayaa adeegyada dowladda hoose taas oo fududeynaysa dowladda inay isku darto iibinta quwadda ee dadkeeda iyo ganacsatada si loo siiyo Adeeg kale ee Aasaasiga ah Eversource (M.G.L. c. 164, § 134). Barnaamijkaani wuxuu kaliya saameynayaa qeybta saadka ee biilkaaga bil kasta. Ma saameynayso qeybta geynta saadka ee biilkaaga bil kasta. Eversource way sii wadi doontaa inay bixiso korontadaada laakiin Boston waxay dooratay saad-bixiyaha Barnaamijka. Constellation waxay siin doontaa saadka quwada korontada dhammaan macaamiisha hadda ku jirta Adeega Aasaasiga ah ee Boston. Waraaqdan waxaa loogu talagalay in lagu sheego wax ku saabsan Barnaamijkan oo loogu talagalay bixinta korontada. Sida waafaqsan sharciga gobolka, waxay kaloo kugu wargalineysaa xuquuqdaada iyo fursadaha aad leedahay haddii aad dooratid inaad ka qaybqaadan Barnaamijka.

- ✓ **SI TOOS AH AYAA LAGUUGU DIIWAANGELIN DOONAA BARNAAMIJKA MARKA LAGA REEBO HADDII AAD DOORATID INAADAN KA QAYBQAADAN OO AAD ISKAGA BAXDID.**
- ✓ **WAA INAAD KA SOO JAWAABTA ABRIL 18, 2024 HADDII AADAN RABIN IN SI TOOS AH LAGU DIIWAANGELIYO.**

WAX ISBADEL AH KAMA OGAAN DOONTID ADEEGGA KORONTADAADA. Farqiga kaliya ee aad arki doontaa ayaa ah in Direct Energy lagu daabici doono qaybta "Adeegyada Saad-qeybiyayaasha" ee biilkaaga bilaha ah. Waxaad sii wadi doontaa inaad hal biil ka hesho Eversource. Waad sii wadi doontaa inaad u dirto lacagahaaga Eversource si ay u diyaariyaan. Eversource waxay sii wadi doontaa ka jawaabto xaaladaha degdegga ah, waxay akhrin doontaa mitirrada waxayna ilaalin doontaa khadadka qaybinta iyo gudbinta. Isku halaynta iyo tayada adeeggu waxay ahaan doontaa sidii hore. Intaas waxaa sii dheer, waxaad sii heysan doontaa dhammaan xuquuqda macaamiisha jirta iyo ilaalinteeda.

QIIMAHA ISBADELKA IYO SHURUUDAHA

	Barnaamijka Boston*			Eversource
	(Adeegyada Saad-qeybiyayaasha Kaliya)			(Adeegyada Saad-qeybiyayaasha Kaliya)
Qiiimaha	CAADIGA AH (caadi)	IKHTIYAARI AASAASIGA AH	IKHTIYAARI GREEN 100	ADEEGGA AASAASIGA AH
Deggaan	\$0.14805 kWh kiiba	\$0.14205 kWh kiiba	\$0.17195 kWh kiiba	\$0.17216 kWh kiiba
Sm C&I	\$0.14805 kWh kiiba	\$0.14205 kWh kiiba	\$0.17195 kWh kiiba	\$0.17552 kWh kiiba
Med & Lg C&I	\$0.14805 kWh kiiba	\$0.14205 kWh kiiba	\$0.17195 kWh kiiba	\$0.11668 kWh kiiba
Nalka wadada	\$0.14805 kWh kiiba	\$0.14205 kWh kiiba	\$0.17195 kWh kiiba	\$0.17552 kWh kiiba
Mawduuca Tamarta La Cusboonaysiin karo	15% MA Class I RECs oo ka sareeya shuruudaha gobolka ugu yar	Buuxiya shuruudaha tamarta la cusboonaysiin karo ee MA	100% MA Class I RECs	Buuxisa shuruudaha tamarta la cusboonaysiin karo ee Massachusetts
Muddada	Diiseembar 2023 – Diiseembar 2025 <i>[Qiimeyaasha ayaa quseeya biloowga iyo dhammaadka adeegga oo ku beegan maalmaha bisha ee cabirkaaga korontada laga akhriyo aagaaga.]</i>			Janaayo 1, 2024 – Luuliyo 31, 2024** <i>[Qiiimaha Deganaanshaha, C&I Yar iyo Nalka Wadada ayaa isbadela 6dii biloodba mar. Dhexdhexaad & Weyn C&I qiimaha isbeddela 3 bil walba.]</i>
Shuruudaha Bixitaanka	LACAG LA'AAN			Waxay heli kartaa lacag dib-u-heshiisiin ama amaah [C&I Weyn oo kaliya ah]

*Qiiimaha waxaa ka mid ah (1) Khidmadda La-Taliyaha ee \$0.0007 halkii kWh si loo fududeeyo (Barnaamijka Xulashada Korontada Bulshada) Community Choice Electricity Program Boston iyo

(2) Dusaarta Shaqada oo dhan \$0.00011 calaa kWh si loo maalgeliyo qarashaadka shaqaalaha ee la xiriira shaqada Maamulaha Tamarta ee Magaaladda.

*Qiiimaha wuu kordhi karaa sababo la xiriira isbadelka sharciga ee keenaya kororka tooska ah ee kharashyada alaabta inta lagu guda jiro muddada qandaraaska.

**Calaa D.P.U. 23-50-Amar soo baxay Sibteembar 1, 2023 (eeg [mass.gov/news/dpu-orders-schedule-changes-to-basic-service-rates](https://www.mass.gov/news/dpu-orders-schedule-changes-to-basic-service-rates)).

MACLUUMAAD MUHIIM AH

- Waqti xadirkaan, Qiiimaha korontada Xaafadaha, Ganacsiyada Yaryar iyo Nalalka wadooyinka ayaa ka hooseeya qiimaha Aasaasiga ah ee Adeegga Eversource. Wadarta qiimuhu waa mid cayiman muddo 24 bilood ah (Diiseembar 2023 ilaa Diiseembar 2025) maadaama Adeegyada Aasaasiga ah ee Eversource uu qiimihiisu isbadello labo jeer sanadkii, bisha Agoosto iyo Febraayo. Sababtaas awgeed, qiimaha isku-darka ayaa laga yaabaa inuusan mar walba ka hoosayn qiimaha qiimaha Aasaasiga ah ee Adeega ee Eversource. Yoolka guud ee iskudarka waa in la bixiyo kaydajda inta lagu jiro nolasha Barnaamijka marka loo eego qiimaha Aasaasiga ah ee Adeega ee Eversource. Hase yeeshee, **KAYDKA NOOCAAN AH IYO KAYDADKA MUSTAQBALKA LAMA DAMAANAD QAADI KARO**
- Ma jirto **ISBEDDELKA KA BIXIDA** barnaamijka iyo ku nooqashada Adeega Aasaasiga ah Eversource.

« QAYBTA DAMBE SI AAD U HESHO MACLUUMAAD DHEERAAD AH »

HADII LAGUGU SOO DIRAY OGEYSIISKAAN uma baahnid inaad wax tallaabo ah ka qaadatid ka-qaybgalka Barnaamijka.

DHAMMAAN MACAAMISHA ADEEGGA AASAASIGA AH kuwaas oo fariinta ogeysiiskan sida TOOSKA AH loogu diray iska diiwaangelinta Barnaamijka ee bilaabay ka faa'iidaydiga isku gaynta qiimaha laga bilaabo maalinta bisha Maajo 2024 ee mitirkaagu akhrinaayo. Taariikhdan way ku kaladuwan yihiin nooca adeega. Taariikhda akhriska mitirkaaga ayaa ku qoran biilkaaga.

LA SOCO BILAASHAADA EVERSOURCE SI AAD U HESHO OGEYSIIS DHEERAAD AH ee Barnaamijka.

- Bilaalkaaga Maajo 2024 wuxuu sheegi doonaa in laga damiyay Barnaamijka Bostan.
- Biilkaaga Maajo 2024 ayaa bilaabi doonaa inay tuso qeybiyaha Boston iyo qiimaha isku gaynta ee jira "Supplier Services".

QORSHSHA MIISANIDYADA AMA U QALMID MACAAMIISHA QIIMAHA DAKHLIGA-YARayaa ka sii heli doonaa faa'iidooyinkan Eversource.

SAMAXADA QORAXA IYO MACAAMIISHA BULSHADA QORAXDA ayaa sii helaya shabakadda mitirka ama lacagaha biilka inta aad helayso bixinta korontada ee ku jira Barnaamijka iyo qiimeynta dhibcaha ma la beddeliyo haddii laga qeybgalo Barnaamijka.

CANSHUUR WALBA OO LAGU DABI KARO AYAA LAGU SOO DALACAYA qeyb ahaan Barnaamijka qiimaha bixinta korontada. Adiga ayaa mas'uul ka noqon doona aqoonsiga iyo codsashada ka-dhaafitaan ururinta canshuuraha adigoo bixinaya dukumiintiyada habboon.

MACAAMIISHA GANACSIYADA YARYAR EE CANSHUURTA LAGA DHAAFAY waa inaay u diraan, iimeel ama fakis nuqulka Shahaadadooda Shardi Dhaafka Tamarta Direct Energy Attn: USN Tax Exemption oo ku taala P.O. Box 180, Tulsa, OK 74101-0180 ama usn.taxexemption@directenergy.com (iimeelka) ama (800) 504-7428 (fakiska) si ay u sii helaan aqoonsiga canshuur dhaafka.

HADDII AAD HOREYBA U DOORATAY SAAD-QEYBIYAHA TARTANKA KALIGAA waa inaad ka baxdaa Barnaamijkan. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad korontadaada ka sii hesho Saad-qeybiyahaas Tartameysa.

HADDII HOREY U DOORATAY DOOKHA GREEN POWER IYADDA AAD U MARAYSO ka qeybagalka Barnaamijkan ma saameyn doonto your ka qeybgalistaada Green Power Supply.

HADDII AADAN RABIN INAAD KAQAYB GASHO BARNAAMIJKAN waad: 1) Ka-bixi karta iyo waxaadna sii wadi doonta bixinta heerka Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource; ama 2) Ka-bixi karta waxaadna xullan kartaa Saad-qeybiye Tartameysa aad doontid (haddii mid aad heli karto).

SIDA LOOGA BAXO

- Saxiix oo ku soo celi kaarka ka-bixidda ee ku lifaaqan baqshadda boostada lagu bixiyay; **AMA**
- Booqo boston.gov/bcce kadibna guji batoonka ka bixida, kadibna buuxi oo dir Foomka Bixida; **AMA**
- ka wac Direct Energy (855) 402-5868 oo codso inaad kusii sugnaato Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource.

WAKHTI KASTA OO DIIWAANGELINTA KADIB wali waad iskaga bixi kartaa adigoo bixinin WAX LACAG AH. Waxay qaadan kartaa dhowr wareeg ee biil bixinta kahor intaadan kusoo noqon Adeegga Aasaasiga ah ee Eversource. Haddii aad doorato inaad ka baxdo isdiiwaangelinta hore, waxaad kusoo gudbin kartaa foomka Ka bixida boston.gov/bcce **AMA** ka wac Direct Energy (855) 402-5868 kadibna codso in lagugu daro Adeegga Aasaasiga ah Eversource.

SI AAD U DOORATO SHAYGA AASAASIGA AH AMA SHAYGA LEH 100% EE DIB U CUSBOONEYSIINTA TAMARTA NEW ENGLAND booqo: visit boston.gov/bcce ama waxaad ka wici kartaa Direct Energy (855) 402-5868 waxaadna weydiin kartaa isdiiwaangelinta shayda soo socda:

- **Adeegga Boston's Optional Basic** wuxuu buuxinaya shuruudaha tamabarta dib u cusbooneysiinta ee Massachusetts. Adeegga waxaa lagu baxshaa \$0.14205 calaa kWh muddo 24 bilood ah (Diseembar 2023 ilaa Diseembar 2025).
- Adeegga Boston's Optional Green 100 Product waxay bixineysa 100% heerka MA I RECs ee lagu gaaro iibsiga 76% dheeraadka ah ee Shahaadda Tamarta Dib u cusbooneysiinta (RECs) ee ka sareysa shuruudda hadda ee gobolka ee dib u cusbooneysiisyadan.. Adeegga waxaa lagu baxshaa \$0.17195 calaa kWh muddo 24 bilood ah (Diseembar 2023 ilaa Diseembar 2025).

WIXII FAAFAAHIIN DHEERAAD AH oo ku saabsan Barnaamijka Bostan, fadlan booqo boston.gov/bcce or call us toll-free at (617) 635-3850. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan Direct Energy, fadlan booqo directenergy.com/COB.

SI AAD U HELISO QIIMEYNTA EE ADEEGGA AASAASIGA AH fadlan booqo:

- Qiimaha Xaafadaha – eversource.com/content/residential/account-billing/manage-bill/about-your-bill/rates-tariffs/electric-supply-rates.
- Qiimaha Ganacsiga – eversource.com/content/business/account-billing/manage-bill/about-your-bill/rates-tariffs/electric-supply-rates.



BARNAAMIJKA XULASHADA KORONTADA BULSHADA BOSTON KAARKA JAWAAB-CELINTA KA BIXITAANKA

Haddii aad abto in aad ka qeyb qaadato (Barnaamijka Xulashada Korontada Bulshada Boston) Community Choice Electricity Program, uma baahnid inaad wax tallaabo ah qaadatid.

Si toos ah ayaa lagu diiwaangelin doonaa.

Tilmaamaha Ka Bixitaanka

Haddii inaad ka qayb gasho:

- 1) Saxiixa iyo taariikhda
- 2) Geli boqshada lagu siiyay
- 3) Ku soo dir boostada

Kaarka waa inuu saxiixaa macaamilka diiwaanka uu magaciisu ku yaal ciwaanka kaarkan. **Boqshada waa in boostada lagu soo diraa ugu danbayn Abriil 18, 2024 si aad uga baxdo Barnaamijka kahor inta aan si toos ah lagaaga diiwaan gelin.**

X

Saxiixa

Taariikhda